

# SMITTSKYDDSBBLAD

## Patientinformation

Kikhusta

Översättning till somaliska

Version2023-08-30

### Xiiqdheer, macluumaadka bukaanka

#### Waa maxay sababta aan u helay macluumaadkan?

Baaritaankii ayaa muujiyey inaad qabtid xiiqdheer.

#### Waa maxay xiiqdheertu?

Xiiqdheerta waxaa sababa bakteeriya ku jirta neef-mareenka. Wuxuu badanaa cudurku ku bilaabmaa hargab, oo dabadeed isu beddela qufac xooggan oo ku dhammaada xiiqleyn\* mararka qaarkoodna matag. Dhibaatadu waxay socon kartaa dhowr toddobaad.

Xiiqdheertu waxay sababi kartaa dhibaato xagga neefsashada ah oo aad u xun oo keenta in ay neefsashadu istaagto, gaar ahaan dhallaanka yar yar (carruurta ka yar 1 sano). Haddii haweeneyda uurka lehi ay xiiqdheer qabto marka ay dhaleyso wuu ka qaadi karaa ilmaha ay markaas dhasho, aadbuna ugu xanuunsan karaa

Wakhtiga ka bilaabmaya marka uu qofku cudurka qaado ilaa uu qofku u jirranayo cudurka (muddada soo ridashada cudurka) inta badan waa 1-2 toddobaad. Mararka qaarkood waxay qaadan kartaa ilaa 3 toddobaad.

\* xiiqdu/fooridu waa cod ama dhawaaq foori ah oo la maqlo marka uu qofku neefta jiidayo, qufac dheer ka dib.

#### Sidee leesu qaadsiyyaa xiiqdheerta?

Bakteeriyyada xiiqdheertu waxay ku faafcaa qufaca ama hindhisooinka. Khatarta ugu weyn ee faafiddeedu waxay ka dhacdaa marka dhismo gudeheed lagu jiro.

#### xiiqdheerta ma la daaweyn karaa?

Ku daawaynta antibiyootigu waxay yarayn kartaa faafidda cudurka, laakiin inta badan saamayn yar ayay ku leedahay calaamadaha cudurka. Waxaa badanaa qofka la daweyaa oo kaliya haddii ay jirto khatar ah in la qaadsiin karo dhallaanka yari ama ku jirran karo.

#### Tallaalku ma caawiyaan xiiqdheerta?

Barnaamijka tallaalka carruurta waxa ku jira in dhammaan carruurta Iswiidhan la siiyo tallaalka xiiqdheerta markay jiraan 3, 5 iyo 12 bilood; da'da 5 iyo fasalada 8-9.

Tallaalku waxa uu yareeyaa halista ah in dhallaanka yar yari ay si xun u jirradaan. Khatarta aadka u xun ee cudurku waxa uu sii yaraadaa marka uu ilmuuhu qaato qiyaastiisa ugu horeysa ee tallaalka. Ilaalinta tallaalku waxay bilaabataa inay yaraato 5 sano kadib.

Tallaalku si dhammaystiran ugama ilaalinayo in la qaadsiyo cudurka. Dadka la tallaalay way u jirran karaan oo waxay qaadsiin karaan dadka kale.

## Haddii aan anigu qaaday cudurka xiiqdheerta, ma ku jirran karaa cudurka mar kale?

Ka dib marka uu qofka ku dhaco infekshanka xiiqdheertu, difaaca jirku (ilaalintu) waa ku dhawaad 15 sano. Markaas ka dib, wuu qaadi karyaa qofku xiiqdheer mar kale, wuuna qaadsiin karyaa xitaa dadka kale.

## Ilaa intee ayaan anigu cudurka dadka kale qaadsiin karaa?

Xiiqdheerta waxa aad loo kala qaadaa bilawga hore markuu qofku cudurka u jirrado, balse qaadsiintu way sii yaraataa markuu wakhtigu ii dheeraadaba. Si sax ah loo sheegi karo goorta khatarta cudurku ay dhammaanasyo, laakiin dhowr toddobaad markuu qofku jirrado ka dib khatarta ku daarashada cudurka ayaa aad u yaraata. Markuu qufucu tago, ma jirto wax khatar ah inuu cudurku sii faafo.

## Maxaan anigu ka fikira si aannan dadka kale u qaadsiin?

- Ka fogow inaad xiriir la samayso dhallaanka yar yar iyo haweenka uurka leh ee ku jira xilliga dhammaadka uurka.
- Haddii aad la kulantay ilmo ama haween uur leh ilaa iyo markii aad cudurka u jirratay, waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaga sida ugu dhakhsaha badan.
- Carruurta ay ku dhacday xiiqdheertu waxay dib ugu laaban karaan dugsiga xannaanada marka ay tamartii iyo ciyaartii u soo noqoto oo ay wax cuni karaan waxna cabbi karaan sidii caadiga ahayd.


## Raad raaca faafida cudurka

Sida uu qabo sharciga ilaalinta cudurrada faafa, waad ku khasban tahay inaad ka qayb qaadato raad raaca ama baaridda cudurka. Taas macnaheedu waxa weeye inaad siiso maclumaaad shaqaalaha daryeelka caafimaadku si ay u baaraan goorta, meesha iyo sida loo malaynayo inaad cudurka ku qaadday iyo haddii laga yaabo inaad dad kale qaadsiisay.

Waxa aad sheegto waa sir (qarsoodi) dadka aad sheegi doontaana ma ogaan doonaan qofka aad tahay.

## Maclumaaad dheeraad ah

[Xiiqdheer - 1177](#)



## Warqad ku saabsan ilaalinta cudurrada faafa

Warqadda ilaalinta cudurrada faafa waxaa soo saaray Ururka caafimaadka ilaalinta cudurrada faafa waxayna khuseeysa heer qaran.